

Cusbooneysii dakhligeyga ama cinwaankeyga (soo sheeg isbeddelka)

Baro sida loo soo sheego isbeddellada loogu talagalay caymiska Apple Health (Medicaid) ee loogu talagalay Dakhliga Guud La Iswaafajiyey ee Wax Laga Beddelay (MAGI) ama Classic Medicaid.

Goormeen isbeddelka soo sheegaa?

Shakhsiaadka ku qoran caymiska Apple Health (Medicaid) waa in ay isbeddelladan ku soo sheegaan 30 maalmood gudahooda.

Waa maxay noocyada isbeddelka ee aan u baahanahay in aan soo sheego?

Intii lagu guda jirey xaaladda degdegga ah ee caafimaadka guud (PHE) ee COVID-19 Maamulka Daryeelka Caafimaadka wuxuu kordhiyey caymiska loogu talagalay dhammaan macaamiisha Apple Health (Medicaid). Kordhintan ayaa hadda dhammaaneya iyada oo uu sabab u yahay Xeerka Qoondeynta Mideysan, 2023. **Habka ugu wanaagsan ee macaamiisha Apple Health ay ku noqon karaan kuwo xog-ogaal ah waa in waqtiga lala socodsiiyo macluumaadkooda xiriirka.** Tani waxay xaqiijineysaa in aysan seegin ogeysiisyada muhiimka ah ee ku saabsan caymiska, oo uu ku jiro ogeysiiskooda dib-u-cusbooneysiinta.

Ogow isbeddellada loo baahan yahay in la soo sheego **si loogu diyaar-garoobo dhammaadka caymiska joogtada ah:**

- Apple Health (Shakhsiaadka qaangaarka ah, carruurta, haweenka uurka leh, iyo waalidka/daryeelayaasha)
- Apple Health Classic Medicaid (Shakhsiaadka ay da'doodu tahay 65 ama ka weyn, ee indhoolaha ama naafada ah)

Sideen u soo sheegaa isbeddelka caymiska Apple Health (Medicaid)?

Go'aami haddii aad tahay qaataha Apple Health

Waxaan u baahanahay in aan soo sheego isbeddelka:

- Qof qaangaar ah oo ay da'diisu u dhaxeeyso 19 ilaa 64 sano jir, ee aan lahayn Medicare.
- Cunug.
- Haweenay uur leh.
- Waalid/daryeele.

Isbeddello nooc ee ayaan u baahanahay in aan u soo sheego caymiska Apple Health?

Inta lagu guda jiro caymiska joogtada ah, macaamiisha Apple Health waxay weli u baahan yihiin in ay soo sheegaan isbeddelladan soo socda:

- Hoos-u-dhaca ama luminta dakhliga
- Cinwaanka degaanka
- Cinwaanka boostada
- Xaaladda guurka
- Inta qof ee uu qoysku ka kooban yahay
- Uurka
- Xabsi-galidda
- Caynsanaanta caymiska kale ama mas'uuliyadda dhinaca saddexaad (TPL), oo ay ku jirto xaq-u-yeelashada Medicare
- Xaaladda socdaalka ama jinsiyadda
- **Isku-qoridda Barnaamijka Sir Ahaanshaha Cinwaanka (ACP)**

Ikhtiyaarada soo sheegidda isbeddelka caymiska Apple Health

Ikhtiyarro dhowr ah ayaad haysataa si aad u soo sheegto isbeddelka caymiska Apple Health:

- Barta internet-ka: Booqo [Washington Healthplanfinder](#) - gudaha u gal oo dooro "Soo-sheeg isbeddel ku yimaada dakhliga ama qoyska (Report a change in income or household)" ee ku hoos qoran Linkiyada Degdegga ah (Quick Links).
- Telefoonka: Ka wac Xarunta Taageerada Macmiilka ee Washington Healthplanfinder lambarkan 1-855-923-4633.
- Email-ka: askmagi@hca.wa.gov
- Waraaq: U soo gudbi xaqiijinta isbeddelka: HCA-MEDS, PO Box 45531, Olympia WA 98504

Marka isbeddelkaaga laga shaqeeyo, waxaad heli doontaa ogeysiis sharxaya isbeddelo kasta ee lagu sameynayo caymiskaaga ama tallaabooyin kasta ee xiga.

Sideen u soo sheegaa isbeddelka caymiska Apple Health Classic Medicaid? Go'aami haddii aad tahay qaataha Apple Health Classic Medicaid

Waxaan u baahanahay in aan soo sheego isbeddelka:

- Qof qaangaar ah oo ay da'diisu tahay 65 ama ka weyn.
- Qof indhoole ama naafo ah.
- Qof helaya taageero iyo adeegyo muddo-dheer soconaya.

Isbeddelo nooc ah ayaan u baahanahay si aan u soo sheego caymiska Apple Health Classic Medicaid?

Inta lagu guda jiro caymiska joogtada ah, macaamiisha Apple Health Classic Medicaid waxay weli u baahan yihiin in ay soo sheegaan isbeddelladan soo socda:

- Hoos-u-dhaca ama luminta dakhliga
- Cinwaanka degaanka
- Cinwaanka boostada
- Urka
- Xaaladda socdaalka ama jinsiyadda
- **Isku-qoridda Barnaamijka Sir Ahaanshaha Cinwaanka (ACP)**

Ikhtiyaarada loogu talagalay soo sheegidda isbeddelka caymiska Apple Health Classic Medicaid

Waxaad haysataa ikhtiyarro dhowr ah si aad u soo sheegto isbeddelka caymiska Apple Health Classic Medicaid:

- **Barta internet-ka:** Booqo [Washington Connection](#) - dooro "Soo-sheeg Isbeddelka" ka-dibna raac tilmaamaha.
- **Telefoonka:** Ka wac Xarunta Adeegga Macmiilka DSHS lambarkan 1-877-501-2233.
- **Waraaq:** U soo gudbi xaqiijinta isbeddelka: DSHS-CSD, PO Box 11699, Tacoma, WA 98411-6699.

Marka isbeddelkaaga laga shaqeeyo, waxaad heli doontaa ogeysiis sharxaya isbeddelo kasta ee lagu sameynayo caymiskaaga ama tallaabooyin kasta ee xiga.

Linkiyada La Xiriira

- [Goorta isbeddellada la soo sheegayo](#)
- [Isbeddellada ay tahay in la soo sheego](#)
- [Barnaamijka Sir Ahaanta Cinwaanka](#)